# Doorashooyin ilaa Filashooyin: Aragtida Muwaadiniinta iyo Maamulka Degmada Qardho

Farxiya Maxamuud

Faallo Kooban 45 | Abriil 2026


## Soo koobid

- Dadka deggan Qardho waxay muujiyeen filashooyin sare oo ku saabsan hormarinta adeegyada dadweynaha, isla xisaabtanka, iyo maamul ka jawaaba baahiyaha dadka, kadib markii doorashooyin dimuqraadi aha oo golaha deegaan ah laga hirgeliyey Puntland sanadkii 2021.
- Madal ay ka qeyb galeen muwaadiniinta iyo maamulka degmada ayaa lagu gorfeeyay caqabadaha waaweyn ee la xiriira adeeg bixinta, oo ay ka mid yihiin helitaanka adeegyada caafimaadka oo xaddidan xaafadaha degmada qaar kamid ah, dhismayaasha wadooyinka oo liita, dhibaatooyinka nadaafadda, iyo khataraha amni ee ka imaanaya iftiin la'aanta waddooyinka iyo kaaabeyaasha isu-socodka oo aan ku filnayn.
- Maamulka degmada ayaa qiray caqabadahaas, balse waxay carabka ku adkeeyeen in demgadu ay wajahayso xaddidnaan dhaqaale oo ka dhalatay ilaha dakhliga oo kooban iyo u hoggaansanaan la'aanta canshuur bixinta, taasoo daciifisay awoodda degmada ee maalgelinta mashaariicda horumarineed.
- Ka qeybgalayaasha ayaa sidoo kale tilmaamay caqabadaha bulsho iyo dhaqaale ee saameeya dhallinyarada, oo ay ku jiraan shaqo la'aanta, tahriibka, iyo saameynta sii kordheysa ee khamaarka iyo isticmaalka maandooriyaha.
- Kulanka waxa uu banaanka keenay rabitaanka xooggan oo ay muwaadiniintu u qabaan inay ka qeyb qaataan hormarinta degmada, taasoo cadeynaysa fursadaha lagu xoojin karo maamul kaqeybgal leh, lagu sixi karo iskaashiga ka dhexeeya degmada iyo bulshada, islamarkaana lagu dhisi karo heshiis bulsho oo adag.


## Ku saabsan Somali Public Agenda

Somali Public Agenda (SPA) waa hay'ad aan macaash doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.

## Ku saabsan qoraaga

**Farxiya Maxamuud** waa cilmibaare katirsan Somali Public Agenda (SPA).

**www.somalipublicagenda.org**

**© 2026 Somali Public Agenda**

## Hordhac

ka hor intii aan la hirgelin doorashooyinka tooska ah ee heerka dowladaha hoose ee Puntland sanadkii 2021, xubnaha goleyaasha deegaanka waxaa soo xuli jiray odayaasha beelaha taasoo dadka deegaanka ka hor istaagtay inay si toos ah u go'aansadaan cidda ku meteleysa golaha deegaanka. Hannaankan ayaa ah mid ku baahsan dhamaan heerarka dowladeed ee Soomaaliya heer deegaan, heer dowlaw-goboleed, iyo heer federal intaba. Habkan ayaa ah mid fursad siinaya dad kooban, halka uu inta badan bulshada ka reebayo ka-qaybgalka geeddi-socodka dowladnimada.

Sikastaba ha ahaatee, Puntland ayaa noqotay dowlad-goboleedkii ugu horreeyey oo hirgeliyay doorashooyin toos ah oo heer dowladaha hoose ah, kuwaasoo la qabtay bishii Oktober 2021. Doorashooyinkan waxaa tijaaabo ahaan looga qabtay saddex degmo: Qardho, Ufeyn, iyo Eyl, iyadoo qorshuhu ahaa in mustaqbalka lagu ballaariyo degmooyinka oo dhan. Doorashooyinkan waxaa si weyn loogu ammaanay inay horumariyeen maamul-daadejinta iyo dimuqraadiyeynta. Kormeerayaasha ayaa ku tilmaamay doorashooyinka qof iyo codka ah ee ka qabsoomay degmooyinkan guul siyaasadeed oo muhiim ah. Sidoo kale waxaa lagu tilmaamay kuwo xor iyo xalaal ah, taasoo kalsooni siisay dadka ka welwelsanaa musuqmaasuq ama faragelintii hore oo kale (Heritage Institute, 2022).

Degmada Qardho, codbixiyayashu waxay doorteen 33 xubnood oo gole deegaan ah, oo ay ku jiraan sagaal dumar ah, taasoo muujisay horumar laga sameeyay metelaadda jinsiga (MM Somali TV, 2021). Bishii Abriil 2022, golaha cusub ayaa duqa magaalada Qardho u doortay Siciid Cabdi Qaal, oo kartirsanaa xisbiga Mideeye oo ahaa xisbi mucaarad ah, isagoo ka guuleystay musharaxii xisbiga talada haya ee Kaah, Maxamed Buraale Cabdi. Doorashada mursharrax mucaarad ahi waxay muujisay in doorashada duqa magaalada ay u dhacday si caddaalad ah, islamarkaana aan u xaglinin xisbiga talada haya.

Inkastoo doorashooyinkaan ay marxalad muhiim ah u ahaayeen dimuqraadiyeynta Puntland, haddana waxay kordhiyeen rajada iyo filashada muwaadiniinta ee ku aaddan la xisaabtanka, hufnaanta, iyo maamul ka jawaaba baahiyaha deegaanka oo ay ka filayaan hoggaamiyeyaashooda cusub ee la doortay. Iyadoo laga duulayo baahida loo qabo in la isku xiro filashada shacabka iyo awooda maamulka degmada, Somali Public Agenda oo kaashanaysa degmada Qardho waxay magaalada ka qabatay madal furan 25-kii Diseembar 2025.

Faalladan kooban ayaa diiradda saareysa wada-hadalkii Qardho oo ay ka qeybgaleen 51 qof (24 haween iyo 27 rag), kuwaasoo metelaayay ururrada haweenka, dhalinyarada odayaasha dhaqanka, culimada diinta iyo ganacsatada deegaanka si ay si furan uga wada-hadlaan mudnaanta maamulka, caqabadaha adeeg bixinta, iyo baahiyaha horumarineed ee degmada. Kulanka waxaa lagu billaabay bandhig ay sameysay waaxda qorsheynta degmada, oo lagusoo bandhigay qorshaha horumarinta degmada ee 2026. Kadib kulanka ayaa noqday mid dood-wadaag ah halkaasoo duqa magaalada Siciid Cabdi Qaal uu ka jawaabay saddex su'aalood oo hordhac ah oo ay weydiisay Farxiya Maxamuud, oo ah cilmi-baare ka tirsan Somali Public Agenda. Intaas kadib kulanka ayaa sii socday iyadoo su'aalaha loo furay ka qeybgalayaasha halkaas oo ay kusoo bandhigeen weydiimo dheeraad ah.

Kulanka wuxuu socday ku dhowaad labo saacadood, waxaana qeyb ka mid ah duubista muuqaalka laga heli karaa kanaalka Youtube ee SPA. Sikastaba ha ahaatee, caqabado farsamo awgood, muuqaalka la soo geliyay ma muujinayo doodda oo dhameystiran. Weydiimaha iyo warcelinada kulanka ayaa dib looga soo uruuriyay duubista sawirqaadaha iyo qoraallada cilmibaaraha, taasoo si wadajir ah u bixisay diiwaan dhamaystiran oo ku saabsan dooda.

Wada-hadalka ayaa muujiyay saddex mowduuc oo isla xiriira: kororka filashada muwaadiniinta ee ku saabsan maamul wanaaga kadib doorashooyinka tooska ah,

caqabadaha dhaqan-dhaqaale ee weli jira, gaar ahaan kuwa saameeya dhalinyarada iyo dadka nugul, iyo xaddidnaanta awoodda maamulka degmada ee ka jawaabista baahiyaha bulshada, oo ay sababtay koobnaanta dakhliga iyo hoos u dhaca taageerada deeq-bixiyeyaasha. Islamar ahaantaana, ka qaybgalayaashu waxay muujiyeen rabitaan xooggan oo ay ku taageerayaan horumarinta degmada iyagoo adeegsanaya dadaallo iskaa-wax-u-qabso ah, u hoggaansanaan canshuureed, iyo barnaamijyo ay bulshada hoggaaminayso. Dooddu waxay muujisay in maamul loo dhanyahay uu Qardho ku xoogeysanayo.

Faalladan kooban waxay falanqeyneysaa is dhaafsiga fikradaha ee dhex maray muwaadiniinta iyo maamulka degmada intii lagu jiray doodda, waxayna baareysaa sida walaacyada bulshadu ula xiriiraan jawaabaha maamulka. Faallada waxay iftiiminaysaa xiriirka sii kobcaya ee u dhexeeya muwaadiniinta iyo maamulka degmada Qardho, waxay soo jeedinaysaa talooyin tixgelin mudan oo lagu xoojinayo maamul dowladda hoose oo loo dhanyahay, iyo hormar waara.

### Ka-qeybgalka Muwaadiniinta iyo La xisaabtanka Maamulka Degmada

Mid kamid ah mowduucyada ugu muhiimsan ee laga hadlay ayaa ahaa xiriirka u dhexeeya muwaadiniinta iyo maamulka dowladda hoose. Duqa magaalada ayaa sheegay in maamulka degmada uu isku dayayo qabashada wada-hadallo furan ee uu la yeesho dadka deegaanka isagoo qabanqaabinaya kulamo dadweyne, la-tashiga xaafadaha, iyo soo bandhigista miisaaniyadda degmada. Sida uu sheegay duqa magaalada, kulamadaasi waxaa loogu talagalay in lagu xoojiyo fikradda ah in maamulka dowladda hoose sharciyaddiisu ka timaado muwaadiniinta. Maadaama dadka deegaanka ay doorteen golaha deegaanka iyo hoggaanka degmada, maamulka degmada wuxuu u arkaa inay muhiim tahay in la dhageysto cabashooyinka iyo talooyinka bulshada, laguna daro qorshayaasha horumarinta degmada.

Duqa magaalada ayaa sidoo kale caddeeyey in hufnaantu ay muhiim u tahay dhisidda kalsoonida u dhexeysa dowladda iyo muwaadiniinta. Sidaas darteed, maamulka degmada wuxuu bulshada u soo bandhigaa warbixinno maaliyadeed oo muujinaysa dakhliga iyo kharashaadka. Saddexdii sano iyo barkii lasoo dhaafay, degmadu waxay qabatay 11 kulan oo warbixin maaliyadeed lagu soo bandhigay; qiyaastii saddex kulan sanadkii. Kulamadan waxaa loogu talagalay in lagu xaqiijiyo la-xisaabtanka iyo in lagu dhiirrigeliyo ka qaybgalka muwaadiniinta ee maamulka degmada.

Sikastaba ha ahaatee, dooddu waxay soo bandhigtay farqiga u dhexeeya filashada bulshada iyo awoodda maamulka degmada. Kaqaybgalayaal badan ayaa dalbaday adeegyo iyo kaabayaal hormarsan, halka duqa magaalada uu sheegay in degmadu wajaheyso xaddidnaan dhaqaale oo weyn.

Mid kamid ah caqabadaha ugu waaweyn waa u hoggaansanaanta canshuur bixinta oo hooseysa. Xogta degmada waxay muujinaysaa in ay jiraan ku dhowaad 13,000 guryo oo diiwaangashan, balse qiyaastii 3,500 oo kaliya ayaa bixisay canshuurta degmada sanadkii 2025. Farqigaan ayaa si weyn u xaddidaya awoodda degmada ee maalgelinta mashaariicda horumarineed.

Duqa magaalada ayaa tilmaamay in dhibaatooyinka dhaqaale ee bulshada ay qeyb ka yihiin u hoggaansanaan la'aanta canshuurta, balse wuxuu sidoo kale xusay in kalsoonida dadweynaha ay door weyn ka ciyaarto. Iyadoo la wadaagayo macluumaadka miisaaniyadda iyo la-tashiga bulshada ee qorshayaasha horumarineed, degmadu waxay rajeyneysaa inay kor u qaaddo hufnaanta islamarkaana dhiirrigeliso ka qeybgalka muwaadiniinta, oo ay ku jirto bixinta canshuurta.

Arrintani waxay tusinaysaa caqabad weyn oo ku saabsan dhisidda heshiis bulsho oo heer degmo ah, halkaasoo muwaadiniintu ka filayaan dowladda adeegyo, halka degmaduna ku tiirsan tahay dakhli kooban si ay ku bixiso adeegyadaas.

### Walaaca Bixinta Adeegyada iyo Kaabayaasha Dhaqaalaha

Intii uu socday kulanka, ka-qeybgalayaal badan ayaa diiradda saaray caqabdaha la xiriira adeegyada aasaasiga ah ee saameeya xaafadaha kala duwan ee Qardho. Waxay tilmaameen in uu gaabis ka jiro kaabeyaasha bulshada, adeegyada nadaafada, iyo xarumaha caafimaadka kuwaasoo saameeya nolosha maalinlaha ah ee dadka deegaanka.

Tusaale ahaan, mid kamid ah dhalinyarada u ololeeya arrimaha caafimaadka ayaa sheegay in xaafadaha Wadajir iyo Qorya-cad aysan lahayn xarumo caafimaad oo shaqeeya, iyadoo tirada dadka ku nool ay sii kordhayso. Ka-qaybgalahaasi wuxuu soo jeediyay in dadka deegaanka ay si wadajir ah uga qeyb qaadan karaan dhismaha xarumo caafimaad haddii degmadu u fududeyso wacyigelinta iyo isku dubbaridka.

Erayo saameyn weyn yeeshay ayaa sidoo kale ka yimid haweeney ku nool xaafada Calanlay, taasoo ka hadashay dhacdo dhawaan dhacday oo labo haween oo uur leh ay habeekii foosha galeen khatar caafimaad oo weyn. Sababtoo ah xaafadda ma lahayn adeegyo caafimaad oo u dhow iyo gaadiid ku filan, taasoo keentay in haweenkaasi aysan gaarin isbitaalka wakhtigii loo baahnaa, waxaan ka dhashay in mid kamid ah uu canugii ka geeriyooday. Haweeneydu waxay sheegtay in xarunta hooyada iyo dhallaanka oo horay loogu dhisay xaafadda ay wali u xiran tahay in aan la bixin lacagtii lagu dhisay. Waxay maamulka degmada ka codsatay in xallinta arrintan ay gacan ka geystaan iyo sidoo kale inay la abaabulo gacansatada iyo hay'ahada ka howlgala degmada si ay xarunta u bilowdo shaqadeeda.

Duqa magaalada ayaa qiray muhiimadda arrintan, wuxuuna sheegay in maamulka degmada uu ka warqabo baahida loo qabo xarumo caafimaad oo dheeraad ah. Sikastaba ha ahaatee, wuxuu xusay in degmadu ay leedahay awood dhaqaale oo xaddidan, islamarkaana ay ku tiirsan tahay iskaashiga ay la sameyso bulshada iyo deeq-bixiyayaasha si mashaariicda noocan ah loo hirgeliyo.

Marka lagasoo tago arrimaha caafimaadka, ka-qeybgalayaasha ayaa sidoo kale tilmaamay caqabadaha ka jira waxbarashada, iyagoo sheegay in ardaydu ay la kulmaan dhibaatooyin la xiriira manhajka ku baxa af Ingiriiska, islamarkaana loo baahan yahay in fiiro gaar ah loo yeesho horumarinta waxbarashada magaalada.

Kaabeyaasha waddooyinka ayaa sidoo kale ka mid noqday arrimaha sida joogtada ah loo soo hadal qaaday. Ka-qeybgalayaal badan ayaa sheegay in xaafadahooda aysan lahayn waddooyin laami ah, taasna ay adkeynayso isu-socodka gaadiidka islamarkaana ay kordhineyso khataraha amni. Mid kamid ah dadka deggan xaafadda Xingood-Hoose ayaa sheegay in xaafadoodu si liidata ay ugu xiran tahay magaalada inteeda kale, islamarkaana ay ka dhacaan dhacdooyin dhac moobil ah xilliyada habeenkii waddooyinka oo aan dhisnayn iyo Geed-yahuudka ama Garanwaaga oo ku badan xaafadda awgeed.

Sidoo kale, dadka degmada ayaa walaac ka muujiyey masuuliyad-darrada qaar kamid ah wadayaasha mooto Bajaajta oo si aan taxadar lahayn u kaxeeya marar badan, waxayna soo jeediyeen in la dhiso Kuus-Kuuska waddooyinka si loo xakameeyo xawaaraha gaadiidka

Isagoo ka facelinayaa arrimahan ayuu duqa magaaladu tilmaamay guulo dhawaan laga gaaray kaabeyaasha, oo ay ku jiraan dhismaha labo waddo oo laami ah iyo dayactirka waddooyin kale oo magaalada ku yaala. Wuxuuse qiray in gaarsiinta mashaariicda horumarineed dhamaan xaafadaha ay qaadansyo wakhti dheer sababo la xiriira xaddidnaanta dhaqaale.

### Maareynta Deegaanka iyo Qorsheynta Magaalada

Arrimaha deegaanka ayaa sidoo kale ahaa mawduuc muhiim ah oo looga hadlay doodda. Ka-qeybgalayaashu waxay si joogto ah u xuseen caqabadaha nadaafadda, gaar ahaan dhibaatada qashinka lagu daadiyo magaalada dhexdeeda halkii la geyn lahaa meelaha loogu talo galay.

Duqa magaalada ayaa sheegay in magaalada laga fuliyay ololeyaal wacyigelin oo ku saabsan maareynta qashinka, islamarkaana la dhisay guddi shaqaalaha nadaafadda ah, oo ay ku jiraan kooxo ay hoggaaminayaan haween, si loo xoojiyo adeegyada nadaafadda. Sikastaba ha ahaatee, wuxuu tilmaamay in isbeddelka hab-dhaqanka dadka deegaanka uu muhiim yahay si dhibaatadan si waxtar leh loogu xaliyo.

Qaar kamid ah ka-qeybgalayaashu waxay soo jeediyeen xalal ay bulshadu hoggaaminayso. Mid kamid ah wakiilada dhalinyarada ayaa soo bandhigay in dadka deegaanku ay guryahooda ku beeraan geedo si loo hagaajiyo muuqaalka magaalada iyo xaaladda deegaanka. Haddii qoys walba uu geed beero, ayay sheegtay, magaaladu waxa ay noqon kartaa mid cagaaran oo soo jiidasho leh.

Ka-qeybgale kale ayaa soo jeediyey in dadka deegaanka ay nalal ku xiraan bannaanka guryahooda si ay u xoojiyaan dadaallada iftiiminta waddooyinka ee ay degmadu wado. Sida uu sheegay dadaallada nalleynta ama leyrinta waxay kor u qaadi karaan amniga islamarkaan waxay yareyn karaan falalka dambiyada ee dhaca xilliyada habeenkii.

Duqa magaalada ayaa soo dhoweeyay talooyinkan, wuxuuna sheegay in degmadu ay horey u qorshaysay in boqolaal nal lagu xiro waddooyinka. Wuxuu sidoo kale xusay in mashruucyo hore oo nalal qorraxeed ah oo la hirgeliyay sanadihii 2015 iyo 2021 ay dhibaatooyin farsamo iyo xatooyo bateri awgood u shaqeyn la'yihiin. Sidaas darted, degmadu waxay hadda u wareegaysaa nalal koronto caadi ah, kuwaas oo ka adkeysi badan islamarkaana ay sahlan tahay in la dayactiro.

Dooddu waxay sidoo kale tilmaamtay caqabadaha qorsheynta magaalada. Kororka dadweyne ee degedegga ah ee magaalada ayaa sababay khilaafaad dhuleed iyo yaraanta dhul dan-guud oo loo isticmaali karo mashaariicda kaabeyaasha bulshada sida xabaalaha iyo adeegyada guud. Duqa magaalada ayaa sheegay in degmadu ay sameysay sahanno lagu khariideeyo magaalada si loo ogaado meelaha ku habboon xabaalaha, balse qaar badan oo ka mid ah dhulalkaas ay sheegteen dad gaar ah.

### Walaaca Dhalinyarada: Shaqo La'aanta, Tahriibka, iyo Caqabadaha Bulshada

Ka-qeybgalayaasha dhalinyarada ah ayaa muujiyay walaac ku saabsan shaqo la'aanta iyo fursadaha xaddidan ee ay dhalinyaradu ku haystaan magaalada. Mid kamid ka-qeybgalayaasha ayaa soo jeediyay in lacagaha ay uruuriyaan guddiga horumarinta degmada, gaar ahaan kuwa ka yimaada adeegyda sida biyaha iyo korontada, loo isticmaali karo hirgelinta barnaamijyo shaqo abuur ah, sida tababaro ku saabsan xirfadaha shaqada dijitaalka ah.

Tabashooyinkaan waxay ka turjumayaan isbeddello waaweyn oo heer qaran ah, halkaas oo shaqo la'aanta dhalinyarada ay tahay sababta muhiim ka ah ee keentay tahriibka. Ka-qeybgalayaashu waxay xuseen in dhalinyaro badan oo ku nool Qardho ay isku dayayaan inay u haajiraan dibadaha inkastoo uu tahriibku leeyahay khataro badan.

Oday kamid ah ka-qeybgalayaasha ayaa sidoo kale muujiyay walaac ku saabsan saameynta khamaarka iyo isticmaalka maandooriyaha ku leeyihiin bulshada. Wuxuu qiyaasay in baraha khamaarka sida 1XBET, oo ay weheliyaan isticmaalka maandooriyaha iyo tabriibka ay magaalada ka saareen ku dhawaad toban milyan oo doolar sanadkii 2025.

Duqa magaalada ayaa qiray in khamaarka iyo isticmaalka maandooriyaha ay noqdeen caqabado bulsho oo sii kordhaya guud ahaan Soomaaliya. Wuxuu carrabka ku adkeeyey in wax ka qabashada arrimahan ay u baahan tahay iskaashi u dhexeeya hay'adaha dowladda, culimada diinta, iyo ururrada bulshada.

Marka laga hadlayo tahriibka, duqa magaalada wuxuu sheegay in dhalinyaradu ay filashooyin aan macquul ahayn ka haystaan nolosha dibadda. Wuxuu tilmaamay in dadka tahriiba ay inta badan la kulmaan xaalado adag iyo sharciyo aan caddeyn marka ay gaaraan dalalka shisheeye. Sidaas darteed, ayuu sheegay in wacyegelin lagu muujinayo fursadaha ka jira gudaha wadanka ay muhiim tahay si loo yareeyo tahriibka dhalinyarada.

### Fursadaha Dhaqaale iyo Horumarinta Deegaanka

Inkastoo caqabado badan la soo bandhigay intii wada-hadalku socday, haddana ka-qeybgalayaashu waxay sidoo kale ka hadleen fursadaha dhaqaale oo gacan ka geysan kara xoojinta dhaqaalaha magaalada Qardho.

Qaar kamid ah ka-qeybgalayaashu waxay tilmaameen in magaaladu ku taallo meel juquraafi ahaan kulmisa waddooyin ganacsi oo isku xira magaalooyin kala duwan oo ka tirsan Puntlnad. Mid kamid ah dadka deegaanka ayaa soo jeediyey in Qardho ay noqon karto xarun keydin iyo qeybinta badeecooyinka, gaar ahaan alaabta aan lagu keydin karin magaalada Boosaaso heerkulka oo sarreeya awgeed.

Duqa magaalada ayaa sidoo kale cadeeyey fursadaha ka jira xoolaha. Magaalada waxaa horay looga dhisay xarun karantiil xoolaha ah, taasoo leh goobo baaritaan caafimaad, kormeer, iyo xeryo lagu hayo xoolaha. Sikastaba ha ahaatee, xarunta hadda waxay u shaqeysaa si kooban. Sida uu sheegay duqa magaalada, xaruntan ayaa mustaqbalka noqon karta suuq weyn oo lagu kala iibsado xoolaha, halkaas oo ay ku kulmi karaan xoolo dhaqatada iyo ganacsata xoolaha ee ka kala imaanaya gobollada u dhow Qardho. Suuqan wuxuu yareyn karaa kharashaadka ganacsata uga baxa gaadiidka, kuwaasoo hadda safarro dhaadheer u gala si ay xoolo uga soo iibsadaan miyiga fog. Duqa ayaa sidoo kale ku boorriyay muwaadiniinta inay maalgashi ku sameeyaan xaruntan, si ay bulshada deegaanka uga qeyb qaadato horumarinteeda.

Ka-qeybgalayaal kale ayaa soo jeediyey in la sameeyo goobo lagu kaydiyo laguna farsameeyo kalluunka, si loo dheerigaliyo ganacsatada kalluunka ka keena deegaannada xeebaha leh. Hormarinta silsiladdan ganacsi waxay kordhin kartaa dhaqdhaqaaqa dhaqaale ee deegaanka, islamarkaan waxay abuuri kartaa dakhli dheeraad ah oo degmada soo gala.

### Caqabadaha Maamul iyo Kuwa Hay'adeed ee Degmda Qardho

Inkastoo ka-qeybgalayaal badan ay diiradda saareen fursadaha horumarineed, duqa magaalada ayaa marar kala duwan carrabka ku adkeeyey caqabadaha ka haysta qaab-dhismeedka maamulka degmada. Dowladda hoose waxay si weyn ugu tiirsan tahay dakhliga gudaha lagasoo uruuriyo, maadaama taageerada horumarineed ee dibadda ay hoos u dhacday sanadihii u dambeeyay. Intaas waxaa dheer, isbedellada siyaasadeed ee heerarka sare ee dowlda federaalka iyo heerka dowlad-goboleedka Puntland ay marmarka qaar saameeyaan hirgelinta mashaariicda horumarineed, taasoo ka dhigaysa in maamullada degmooyinku ay ku tiirsanaadaan istaraatiijiyado isku-filnaansho iyo iskaashi bulsho ah.

Mid kamid ah muwaadiniinta ayaa sidoo kale cabasho ka muujiyay khilaafka ka dhex jira maamulka degmada. Wuxuu ku booriyey duqa magaalada iyo xubnaha golaha deegaanka inay xalliyaan kala duwanaanshahooda si ay diiradda u saaraan bixinta adeegyada bulshada. Doodahan waxay cadeeyeen filashada guud ee bulshada ee ah in hoggaamiyayaasha la doortay ay muujinayaan iskaashi iyo midnimo si ay wax uga qabtaan baahiyaha iyo dhibaatooyinka bulshada.

### Talooyin Tixgelin Mudan

Iyadoo laga duulayo kulankii qabsoomay, waxa la soo jeedinayaa talooyinkaan soo socda si loo xoojiyo kaqeybgalka muwaadiniinta loona hormariyo maamulka dowladda hoose ee Qardho.

- **Ballaarinta ka qeybgalka muwaadiniinta iyo maamul loo dhanyahay**: degmadu waa inay si joogto ah u qabataa kulamo dadweyne oo ay ka qeyb galaan bulshada deegaanka, ururrada bulshada rayidka ah, dhalinyarada, iyo mas'uuliyiinta degmada si looga arrinsado arrimaha maamulka deegaanka. In la abuuro kulamada noocan ah waxay kordhin kartaa hufnaanta iyo kalsoonida u dhexeysa bulshada iyo maamuka, waxay qorshayaasha horumarineed ka dhigi kartaa kuwo ku salaysan baahiyaha bulshada.
- **Xoojinta dakhli uruurinta iyo u-hoggaansanaanta canshuur bixinta**: degmadu waa inay hirgelisaa ololeyaal wacyigelin ah oo bulshada lagu fahamsiinayo muhiimadda canshuuraha degmada iyo sida dakhligaas loogu adeegsado adeegyada dadweynaha. Sidoo kale, muujinta hufnaan miisaaniyadeed iyo isku dheeli tirka canshuur bixinta iyo horumarinta adeegyada ayaa dhiirigelin karta in dadka deegaanka ay si wanaagsan u bixiyaan canshuurta.
- **Kor-u-qaadista helitaanka adeegyada caafimaadka aasaasiga ah:** Maamulka degamda waa in uu la kaashadaa ururrada bulshada, ganacsatada, iyo bah-wadaagta hormarinta sidii loo howlgelin lahaa xarumaha caafimaadka ee horay loo dhisay iyo in la ballaariyo adeegyada caafimaadka aasaasiga ah ee xaafadaha aan si fiican loo gaarsiin. Sidoo kale waa in mudnaanta la siiyaa xallinta caqabadaha maamulka ama qandaraasyada ee hortaagan furitaanka xarumaha caafimaadka ee la dhammaystiray.
- **Horumarinta kaabeyaasha xaafadaha iyo nidaamyada badbaadda waddooyinka**: Degmadu waa inay dejisaa qorshe horumarineed oo mudnaanta siinaya dhismaha waddooyinka, bullaacadaha, iyo nalalka waddooyinka ee xaafadaha gaar ahaan kuwo sida degdegga ah u koraya. Sidoo kale sameynta nidaamyada badbaadada waddooyinka si loo xakameeyo xawaaraha gaadiidka iyo tallaabooyin kale oo dhanka maamulka taraafikada ah waxay gacan ka geysan karaan hagaajinta badbaadada waddooyinka.
- **Hagaajinta nadaafadda iyo maareynta deegaanka:** Maamulka degmadu waa in uu ballaariyaa adeegyada qashin-qaadista iyo ololeyaasha wacyigelinta deegaanka si loo xalliyo caqabadaha nadaafadda. Sidoo kale, dadaallo ay bulshadu hormuud ka tahay sida beerista dhirta iyo ololeyaasha nadaafadda xaafadaha waxay kaalin ka qaadan karaan maareynta deegaanka iyo ilaalinta nadaafadda, sidoo kale waxay kor u qaadayaan kaqeybgalka bulshada ee maamulka.
- **Wax-ka-qabashada shaqo la'aanta dhalinyarada iyo kororka tahriibka:** Degmadu waa inay la shaqeysaa ururrada degmada iyo ganacsiga gaarka loo leeyaay is loo taageero tababarro xirfadeed, barnaamijyo hal-abuur ganacsi, iyo horumarinta xirfadaha dhijitaalka ah ee dhalinyarada. Ololeyaal wacyigelineed oo ku saabasn khataraha tahriibka aan nidaamsanayn ayaa sidoo kale qeyb ka noqon kara yareynta dhalinyarada ta tageysa magaalada si ay fursado uga raadsadaan dibadda. Culimada diinta waa inay ka qeyb qaataan dadaallada wacyigelinta si dhaliyarada looga waaniyo khamaarka iiyo waxyeelladiisa diineed iyo bulshaba.
- **Dhiirrigelinta fursadaha horumarinta dhaqaalaha:** Meesha ay ku taalo Qardho juqraafi ahaan waa goob muhiim ah oo fursad u ah in ay Qardho noqoto xarun ganacsi iyo suuq xoolaha oo gobolka ah. Ballaarinta suuqyada xoolaha, hagaajinta kaabeyaasha keydinta badeecooyinka iyo kalluunka, iyo dhiirrigelinta maalgashiga ganacsiga gaarka loo leeyahay waxay ka qeyb qaadan karaan kor-u-qaadista dhaqaalaha degmada islamarkaana kordhin karaan dakhliga degmada.

**Tixraac**


- *Heritage Institute for Policy Studies. Puntland's Local Elections: A Transition to Social Contract. Mogadishu: Heritage Institute for Policy Studies, 2022. Accessed March 11, 2026.* https://heritageinstitute.org/wp-content/uploads/2022/12/Puntlands-Local-Elections-1.pdf.

- *MM Somali TV. "Qardho: Natiijada Doorashada Golaha Degaanka ee Degmada Qardho iyo Liiska Guulatstayaasha Golaha Deegaanka ee Degmada Qardho," Facebook post, October 26, 2021,* https://www.facebook.com/watch/?v=302890664731810


*Warbixintan waa middii labaad ee lagasoo saaray afar kulan dadweyne oo taxane ah oo laga sameynayo Dhuusamareeb iyo Koonfurta Galkacyo oo katirsan Galmudug, iyo Qardho iyo Waqooyiga Galkacyo oo katirsan Puntland. Kulamadan waxaa loogu talagalay in lagu xoojiyo ka qeybgalka muwaadiniinta ee dowladaha hoose waxaana taageeray National Endowment for Democracy.*


**Somali Public Agenda**

Mogadishu Somalia

+252(0)85 8358

info@somalipublicagenda.org

<https://www.somalipublicagenda.org>

@somalipubagenda